



La baddalay

**A**asaaska bixinta daryeelka

## Qaamuuska Erayada

**A**

Eray	Sifeynta
Ka tagidda	Ka tagidda ama cidleynta qof aan haynin waddada ama awoodda uu naftiisa/nafteeda ku xanaaneyso
Caloosha	Qeybta hoose dhexda jirka
Xumaan	Talaabo lagu talagalay ama ficil la'aan oo u horseedda waxyeelo
Dhageysiga firfircoon	Hab lagu dhageysto oo ahamiyadda siiya qofka kale iyo hubsada in aad fahamtay waxa la sheegay
Hawlaha Nolol Maalmeedka (Daily Living) (ADLs)	Hawlaha daryeelka uu qofka qabto maalin kasta, kana mid ah qabeyska, musqusha, labbiska, isqurxinta, nadaafadda, dhaqaaqa iyo cunidda
Siinta	Siinta ama shayga lagu dabaqo qof
Dardaaranka Caafimaadka	Tilmaamo qoran oo sharaxa rabitaanka qofka kuna saabsan go'aanada caafimaadka ee loo baahan yahay in la sameeyo haddii iyada/isaga uusan awoodin in uu go'aan u gaaro isaga/iyada
Adult Family Home	Guriga la daggan yahay, xaafadda, shatti ku haysta daryeelka 2 - 6 qof muddo 24 saac.
U doodid	Si loo taageero ama talaabo loo qaado qof ama shay
Da'	Habka jirka iyo maskaxda ee lagu duqoobo
AIDS (Calaamadda Cilladda Difaaca la Qaado) (Acquired Immune Deficiency Syndrome)	Cudurka weeraro siistemka difaaca, oo jirka ka ilaaliyo in uu la dagaalamo cudurka
Ku faafa hawada	Xariirka lala sameeyo jeermiga ku safra hawada
Xasaasiyadda	Dareen sare iyo ka jawaabidda maadooyinka qaar (tusaale ahaan raashinka qaar, xubuubta ubaxa, qaniinyada shinnida)
Cudurka Alzheimer	Qaladka hoos u dhaca maskaxda ka sii dara ee saameyaa xasuusta, garashada, iyo shakhsiyadda
Socsocodka	Habka socodka ama warwareegga
Deeqidda xubin ka tirsan jirka	Dardaaranka caafimaadka ee cayima qeybaha jirka qofka loo isticmaali karo ku-talaalidda ama xagga ujeedooyinka cilmi baarista
Dhismaha jirka	Dhismaha jirka
La aqoonin	Lama magacaabin ama lama aqoonsanin

APS	Adeegyada Badbaadinta Qofka Weyn, qeyb ka tirsan DSHS oo qabata telefoonada la soo diro iyo baarta xumaatada la tuhunsan yahay guriga qofka ama abarmanka
Neefsiga waxyaabaha adag ama dareeraha	Neefsiga adeegga ama dareeraha ilss gudaha sambabaha
Weerar	Weerar loo geysto qofka oo sharci darro ah
Ku adkeysiga	Dhaqanka kalsoonida, aan cabsaneynin in uu sheego waxa qofka uu rabo ama aaminsan yahay
Qiimeynta	Aruurinta macluumaadka si loo ogaado kaalmadaa macaamilka u baahan yahay
Tafaasiisha qiimeynta	Qeyb ka tirsan qorshaha daryeelka DSHS taasoo sharadxa xoogga macaamilka, waxayaabaha ka xadidan, iyo hawlaha daryeelka u jecel yahay, iyo tilmaamo cayiman ka bixiya bixiyaha daryeelka.
Qalabka taakuleynta	Qalabka qofka ku kaalmeeya in uu fulliyo hawsha iyo xajisto ama dib u soo ceshado madax banaani
Autism	Cudur ku dhaca maskaxda oo laga yaabo in uu si culus u itaal dareeyo awoodda luqadda ama awoodda xariirka lala sameeyo dadka kale

## B

Bakteriya	Nafleyda lagu arko mikrokoobka (jeermiga), oo sabab u noqon kara cudurada
Baseline	Heerka "caadiga" sida qofka u shaqeeyo (jirka, caatifadda, madaxa iyo bulshada)
U sii jeeda sariirta	Ku aruursan sariirta
Bedpan	Surfiyadda loo adeegsado in lagu aruuriyo kaadida iyo/ama saxarada inta qofka uu ku sugan yahay sariirta
Caqiidada	Fikradaha shakhsiga, dareenka, iyo ra'yiga
Eexda	Fikrad saamaysa garashadaada
Halista bilojiyada	Halista dhibaata ay sababta u yahiin qaar ka mid ah noocyada waxyaabaha nool iyo/ama wasakhda ay soo saaraan
Wareerka Lama-madaxa	Waxaa kaloo loo yaqaan cudurka labo madaxa, qalad ku dhaca dabeecadda qofka oo sabab u ah waqtiyada farxadda ama boodboodka badan iyo waqtiyada niyad jabka ama tiiraanyada
Kaadi haynta	Xubinta kiishka lagu qaado kaadida ka hor inta aan la daadinin
Cudurada dhiigga raaca	Cudurka sababta u ah jeerminga ku faafa xariirka lala sameeyo dhiigga
Cadaadiskaa dhiigga (BP)	Oiyaasta cadaadiska la saaro darbiyada xiddada dhiigga marka wadnaha bambeeyo
Boarding Home	Hay'ad balaaran, la daggan yahay oo shatti ku haysata daryeelka 7 qof ama ka badan



Xanaanada jirka	Kaalmada macaamilka laga siiyo jimicsiga, daryeelka maqaarka, kana mid ah saliidda ama subagga la marsado oo aan loo qorin, iyo baddalaadda sharootada qalalan
Luqadda Jirka	Waxa leysugu gudbiyo dhaqaaqa, qaabka, wijiga iyo indha leysku eego
Jimicsiga jirka	Siyaabaha loo qaado si leysaga ilaaliyo dhaawaca
Siistemyada jirka	Siyaabaha jirka u shaqeeyo si loo fulliyo hawlaha lagama maarmaanka ah. Tusaale waxaa noqon kara siistemka wareegga wadnaha, xididdada dhiiga iyo dhiigga
Lafta ka hooseyso maqaarka	Jiirka halka lafta u dhawdahay maqaarka, soo buurata, kana mid ah xusulka, jilibka, iyo lafta balaaran ee garabka.
Socodka caloosha	Habka saxarada (xaarka) looga saaro jirka
Brainstorming	Bandhigidda siyaabaha badan ee loo xalliyo masalada
Daal	Xaaladda daalka jirka, caatifadda, iyo madaxa

## C

CPR (dib u kicinta wadnaha sambabka)	Habka kaalmada kowaad marka wadnaha ama neefta si degdeg ah u joogsadaan
Kaloriyo	Cabbirka qiyaasta quwadda raashinka laga helo
Kansarka	Unugyada cudurka qaaday oo si aan la kantarooli karin u kora, faaha iyo burburiya hilibka iyo xubnaha caafimaadka qaba
Baakoorta	Usha lagu socdo ee loo isticmaalo miisaanka ama in lagu tiiriyo culeyska
Karbohydraatka	Maadooyinka quwadda siiya jirka
Xididdada wadnaha	Waxyaabaha ku lugta leh wadnaha, dhiigga, iyo xididdada dhiigga
Cudurka xididdada wadnaha	Cudur kasta oo saameeya wadnaha ama xididdada dhiigga jirka, laguna magacaabo cudurka wadnaha
Bixiyaha xanaanada	Qofka bixiya daryeelka shakhsiga, taakuleynta, iyo kaalmada la siiyo qof kale
Care plan	Qorshe qoran oo soo taxa wax kasta ay kooxda daryeelka loo baahan yahay in ay sameyso si ay u taakuleyso macaamilka
Xaaladda daryeelka	Meesha macaamilka ku nool yahay (guriga qoyska qofka weyn, guriga xerada ama daryeelka lagu siiyo gudaha guriga)
Kooxda xanaanada	Qof kasta oo daryeel siiya macaamilka, kana mid ah aqoonyaanada, qaraabada, iyo qofka la siiyo daryeelka

Maalmulaha kiiska	Qofka kaalmeeya macaamilka in uu sifeeyo adeegyada loo baahan yahay, oo ku qora qorshaha daryeelka, iyo siiya maamulka kiiska
Katarakt	Caadka soo gala dhalada isha
Unug	Qeyta aasaasiga ee dhamaan waxyaabaha nool
Maskaxda	La xariira maskaxda
Shilka Unugyada Maskaxda	Waxay dhacdaa marka xinjita ay dhiigga ka joojiso maskaxda, xerto xiddidka, ama dhiigga ku furmo maskaxda; oo sidoo kale loo yaqaan "stroke" ama dhibka soo gaaro maskaxda
Kiimiko	Maado ama maadooyin isku jira
Halista kiimikada	Maadooyinka waxyaabaha halista
Ku Daweynta Kiimikada	Daweynta marka la isticmaalo dawooyinka; inta badan loo isticmaalo kansarka
Choking	Raashinka, shayga ama bararka xera meesha hawada marto ilaa samababaha
Kolestarool	Maado caddiin leh ee laga helo hilibka jirka iyo dhiigga
Cudurka Soo Noqnoqda ee Xera Sambabaha (COPD)	Xaalad sii badata oo aan dib loo celin karin kuna saabsan siistemka neefta uu qofka ku adag tahay neefta taasoo ugu wacan dhibaato ka haysata sambabaha
Siistemka wareegga jirka	Wadnaha, xiddidada dhiigga, dhiigga, iyo dhamaan xubnaha bambeeya iyo qaada dhiigga iyo dhacaanka kale ee ku jira jirka
Macaamil	Ahamiyadda kooxda daryeelka, qofka u baahan kaalmada
Garashada	Fakarka, habka ogaanta madaxa
Itaal darrida garashada	Xaaladda halkaas uu qofka dhibaato ku qabo fakarka macluumaadka
Wada shaqeynta	Labo qof ama ka badan oo ka wada shaqeeya ujeedo khaas ah
Qaliinka mindhicirka	Duleelka lagu sameeyo caloosha korkeeda halkaas oo loo furo saxarada kaddibna lagu toosiyo dibadda jirka
Suuxid	Suuxsan, aan soo jeedin
Commode	Kursi la dhaqaajin karoi oo laga helo saxan lagu qabto kaadida iyo/ama saxarada; loo isticmaalo musqusha
Cudurka Leysku Qaadsiiyo	Cudur kasta oo ku faafa qof ilaa qof kale
Isgaarsiinta	Isdhaafsiga macluumaadka marka la hadlo, qoro, la dhaqaajiyo jirka, ama dabeecadda
Qarsoodi	Aan muujinin macluumaadka shakhsiga
Wareer	Maskax ahaan wax aan caddeyn ama aan la hubin
Wadnaha Cabburo oo Joogsado (CHF)	Wadnaha ma xoog badna in ku filan uu dhiigga ku gaarsiiyo jirka oo idil, wuxuu wax u bambeeyaa si tabar darran taasoo keenta in dhiigga ku haro xiddidada iyo xubnaha jirka
Ogolaasho	Ruqsad



Calool fadhi	Dhibaato ama xanuunka caloosha socoto, saxaro adag
Leysku daarto	Waxaa si fudud u faafiya hal qof ilaa qof kale
Wasakhaysan	Meel ama shay laga helo jeermi aad u badan
Muruq go'	Marka hilibka muruqa soo gaabto maxaa yeelay waxaa ku dhacay jiid go' ama itaal darri, oo joogto ama ku meel gaar ah
Wasakhda leys dhaafsado	Marka jeermiga ka yimaada raashinka ceyriinka ama wasakhaysan uu galo raashin kale oo aan la karinin ama dib loo kululeeyo ka hor inta aan la cunin
CRU	Qeybta Xallinta Ashtakada (Complaint Resolution Unit), qeybta ku dhex jirta DSHS ee qabata telefoonada soo dhaco iyo baarta xumaatada la tuhunsan yahay, gudaha guriga qoyska weyn, guriga xerada ama guriga xanaanada.
Baakoork	Taakuleynta loo adeegsado in lagu kaalmeeyo socodka, waxay galaan hoosta shakhfasha, badanaa waxaa loo adeegsadaa labo-labo
Baaq/Baaqid	Si loo xasuusiyo ama loo su'aalo qof
Hiddahii hore	Dabeecadda iyo sifooyinka dhaqanka koox bushadeed oo gaar ah ama urur, kana mid ah fikradaha laga qabo raashinka, labbiska, diinta, xariirka qoyska iyo kaalinta
Caado	Dhaqan muddo dheer qaata ama wax la aaminsan yahay, habka wax loo sameeyo

## D

Goobta Halista	Heerkulada uu jeermiga dhakhso ugu koro marka raashinka halistaa keeni karaa lagu haayo heerkuladaas
Isku xaarid	Caloosha ku socota
Waxa halaaba	Diidmada xaalad hore ama xaalad caadi ah
Biyo bax	Dhacaan aan ku filnayn oo ku jira jirka
Cudur ama dhaawac soo gaara madaxa	Luminta awoodda garashada lagu daaray isbaddalada shakhsiyadda
Cudurada madaxa	Cudurada sababa marka caqlig alumo; waxaa ka mid aah: Alzheimer's, Vascular dementia, Parkinson's dementia, Huntington's chorea, Pick's Disease, AIDS dementia, Jacob-Cruetzfeldt disease, and Korsakoff's disease
Muuji	Si loo muujiyo
Diidmo	Diidmada in la aamino
Ilkaha la gashto	Ilkaha beenta ah amaa ilkaha la aliffay oo laga yaabo in lagu baddalo qaar ama dhamaan ilkaha qofka; waxaa dhici karto in lagu sifeeyo in ay qeyb yahiin ama in ay dhamaystiran yahiin, iyo kore ama hoose
Niyad jabka	"niyad jab", waxay muujin kartaa xiiso la'aanta hawlaha caadiga ama isbaddalka ku dhaca cunidda ama qaababka hurdfada, waxay muujin kartaa dareenka rajo la'aanta, qiimo la'aanta ama fakarka in qofka uu is dillo
Maqaarka hoose	Maqaarka gudaha

Developmental disabilities	Xaalad bilaabta ka hor inta qofka uusan gaarin 18 sanno oo la filaayo in ay gaarto cimriga qofka taasoo si dhab ah u soo koobto isaga/iyada, meelahaan soo socda: daryeelka nafta; isgaarsiinta; wax barashada; dhaqaaqa; iyo ama hoggaaminta qofka naftiisa. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah Calaamadda Down, jugta soo gaarta madaxa iyo autism
Sokorow	Nooca 1 - cudur soo noqnoqda oo ku dhaca siistemka qinjirada halkaas uu beer yaraha sameeyo insuliin yar ama uusan sameynin insuliin Nooca 2aad - Beer yaraha wuxuu sameyaa insuliin hase ahaatee jirka si wanaagsan uma isticmaalo
Baarista	Magaca cudurka ama xaaladda caafimaadka
Shubanka	Qiyaas badan biyaha saxarada
Aqoonyaanka cuntada	Aqoonyaanka caafimaadka ee ku takhsusa qorsheynta cuntada iyo diyaarinta
Shiididda	Hawsha jirka ka qabto jejbinta makaanikada iyo kiimikada jirka, loona baddalo qaababka geli kara dhiigga kaddibna waxaa isticmaala unugyada
Siistemka shiididda	Kooxda xubnaha jirka ee qaada shiididda, kana mid ah afka, caloosha, iyo mindhicirada
Xariirka toosan	Sida toosan uu cudurka u faafo laga bilaabo hal qof ilaa qofka kale
Itaal darrida	La'aanta mid ama ka badan awoodda jirka ama maskaxda ay inta badan dadka qabaan
Cudur	Sida qaladka ay u shaqeyaan qeybaha jirka; lama shaqeeyo da'da
Dilidda jeermiga	Isticmaalka milanka caddeyaha ama nadiifiye kale oo lagu dilo jeermiga
Jaha wareerka	Wareer ku saabsan waqtiga, taariikhda, xilliga, goobta ama aqoonsiga qofka
Kaadida badan	Maado kordhisa soo saarka kaadida
Warqad	Si loo sameeyo loona haayo diiwaan qoran
Draw sheet	Marada loo dhigo qofka hoostiisa loona isticmaalo in lagu dhaqaaqiyo sariirta dhexdeeda
Droplet spread	Xariirka lala sameeyo jeermiga ka yimaada qof qaaday xanuunka marka ay qufacaan ama hindhisaan
Isdhexgalka daawada	Isdhexgalka ka dhexeeyo daawada iyo maado kale oo badanaa dhalisa waxyeelo aan la jeceleyn iyo ka hortagta in daawada u shaqeyso sida loogu talagalay
DSHS	Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka, wakaaladda gobolka ee bixisa barnaamijyada iyo adeegyada si loo kaalomeeyo caruurta, dadka waaweyn, iyo qoysaska gobolka Washington
Qorshaha daryeelka DSHS	A plan of care (care plan) waxaa qoray wakiilka DSHS u qaabilsan macaamiilka DSHS



Dysphagia	Dhibaataada iyo liqidda
-----------	-------------------------

## E

E coli	Bakteeriyaha laga qaado raashinka ama biyaha wasakhaysan taasoo sabab u ah xanuun ka dhaca mindhicirada yaryar
Biyaha jirka gala	Bararka, dhacaanka ku haray hilibka; waxaa badaana laga arkaa cirbaha, lugaha ama gacmaha
Xumaatada loo geysto waayeelka	Sida xun ee loola dhaqmo waayeelka
Elimination	Habka wasakhda looga saaro jirka, caloosha ama kaadi haynta
Caatifadda	Dareenka
Caatifadda iyo baahida bulshada	Sharuudaha aasaasiga raali gelinta iyo saaxiibtinimada
Enabler	Shay kasta oo macaamilka ku kaalmeeyo in uu qaato daawadiisa/daawadeeda (tusaale ahaan; koob, qaado)
Socodsiinta caloosha	Dhacaanka la geliyo futtada ama kicinta caloosha, ama si loo siiyo daawo ama daweyn kale
Deegaanka	Agagaarka saameeya qofka, kana mid ah iftiinka, dhawaaqa, jirka, iyo dhaqaaqa
Qalalka	Cudurka siistemka xididdada sida qalalka C
libsiga lagama maarmaanka ah	Ku kooban safaro gaaban, marmar ah oo lagu tago xaafadda si loo soo iibsado raashin, lagama maarmaanka daawada, iyo waxyaabaha reerka u baahan yahay xagga caafimaadka, dayactirka, iyo fiyoobida macaamilka
Saxaro	Si looga saaro jirka
Waxa dhaca	Si hawada looga saaro sambabaha
Fiidda	Xibnaha jirka, sida gacmaha iyo lugaha
Ku qabashada isha	Labo qof oo si toos ah isu fiiriya

## F

Wiji furnaanta	Fiirinta wijiga qofka
Saxarada ku xeranta mindhicirka	Saxaro buuran oo qalalan, saxaro adag oo aan soconin
Saxaro	Wasakhda jirka ee ka timaado caloosha
War celin	Rogaal celinta ama jawaabta laga bixiyo shay
Tubeoyinka quudinta	Tubeoyinka khaaska ee caloosha gala si ay u siyaaan nafaqo
Qandho	Heerkulka jirka ka sareeyo caadiga
Jirka	Qolofa loo baahan yahay in la saaro





Ka fa'iideysiga maaliyadda	Isticmaalka sharci darrada ama aan habbooneyn ee hantida qofka weyn ee nugul, lacagta, ama ilaha
Kaalmada kowaad	Daryeelka degdegga ee la sameeyo ka hor inta kaalmada caafimaadka aysan imaanin
Dabacsanaan	Awoodda lagula qabsado ama looga jawaabo isbaddalada ama si loo laabo kala goyska
Cudurka laga qaado raashinka	Cudur kasta oo la qaado marka la cuno raashin wasakh
Kooxaha raashinka	Miro, caano, frutto iyo khudaar, brotiin
Jab	Jabka ku dhaca lafta; lafta jaban
Lissanka	Marka hal shay lagu xoqo shay kale

## G

Gait belt	Suun lagu xerto dhexda si loo kaalmeeyo wareejinta iyo socodka
Siistemka GI (Caloosha iyo mindhicirada)	Kooxda xubnaha ka shaqeeyo raashinka jirka isticmaalo kana mid ah afka, dhuunta, caloosha, mindhicirka, beerka iyo caloosha hoose
Daawada caadiga	Daawo aan la lahayn ama ay shirkadda kantaroosho
Hoosta ragga	Xubnaha dhalmada dibadda, meelaha jirka "gaarka"
Germ	Nafley yar, aan la arkeynin, nool sida bakteeriya, firus, ama fungus
Calaamado	Dhaqaaqa lagu sameeyo gacmaha kore, gacmaha hoose ama jirka
Glokoma	Cadaadis badan gudaha dhalada isha
Sokor	Sokor
Qalalka weyn	Qalalka ka dhasha marka la lumiyo garashada
Calool xumada iyo calool xun	Calool xumada dhimashada
Ashtako	Ashtako rasmi ah
Sharciyada Dagsan	Sharciyada aasaasiga dabecadda
Dambi	Dareenka in qof uu ka dambeeyo shay

## H

Caado	Shay aad sameysid inta badan iyo si joogto ah, marmar adiga oo aan ogeyn in aad sameysid
Halis	Ilaha suurtoogalka aha ee halista, keeni kara dhaawac ama dhibaato

Health care directives	Tilmaamo qoran oo macneeyo rabitaanka qofka oo ku saabsan go'aanada caafimaadka ama dhamaadka nafta loona baahan yahay in la sameeyo haddii iyada/isaga uusan awoodin in uu naftiisa/nafteeda u gaaro go'aano; waxaa kaloo lagu magacaabaa Dardaaranka Caafimaadka
Kaalmada maqalka	Qalab la gashto dhagta si loo hagaajiyo maqalka
Itaal darrida dhageysiga	Luminta dhawaaqa, maqal la'aanta
Cudurka wadnaha	Xaalad aan caadi ahayn oo ku dhacda wadnaha iyo/ama wareegga
Cagaariyow	Cudur ku dhaca beerka kana dambeeyo firus, waxaa ka mid ah Cagaariyow A, B, C iyo kuwo kale
HIV (Firuska Cilladda Difaaca Aadanaha)	Firuska ka dambeeyo AIDS
Marti soor	Dhir, xoolo ama aadane, halka uu ku nool yahay ku-dul noole
Nadaafad	In la dhowro nadaafadda lagana dilo jeermiga
Sokor badan oo ku jirta dhiigga	Sokor heer sare oo aan caadi ahayn oo ku jirta dhiigga
Dhiig kar badan oo aan caadi ahayn	Cadaadiska sare ee dhiigga oo aan caadi ahayn
Sokor yar oo ku jirta dhiigga	Sokor heer hoose oo aan caadi ahayn oo ku jirta dhiigga
Dhiig kar yar oo aan caadi ahayn	Dhiig kar hoose oo aan caadi ahayn

I

Dhaqaaqin	Aan awoodin dhaqaaqa
Difaac	Diidmada cudur khaas ah maxaa yeelay waxaa jira unugyada ka hortagga bakteeriyaha iyo firuska
Siistemka difaaca	Unugyada, qaadeyaasha kiimikada, iyo brotiinka wada shaqeeyo si ay jirka uga badbaadiyaan cudurada
Talaalka	Daawada caafimaadka la qaato si leysaga ilaaliyo cudur khaas ah
Saxarada ku xeranta mindhicirka	In aan la awoodin in caloosha socoto, in saxaro adag xerto caloosha
Impaired	Aan si sax ah u shaqeynin
Aan dhaqaaqin	Aan dhaqaaqin, aan shaqeynin
Itaal darran	Aan awoodin in uu wax qabto, jawaabo (macnaha qofka aan awoodin in uu gaaro go'aano ku saabsan daryeelkiisa/daryeelkeeda
Warbixinta dhacdada	Diiwaan qoran oo laga sameeyo shay aan caadi ahayn, la filayn ama qalad
Kaadida soo tifiqda	Awood la'aanta lagu kantaroolo kaadi haynta iyo/ama shaqada caloosha
Madax banaan ama Madax banaani	In qofka isku haleeyo naftiisa, awoodo in uu naftiisa sameeyo hawsha
Xariirka dadban	Taabashada shay uu taabtay qof cudur qaba



Indwelling catheter	Tubo la geliyo kaadi haynta si loo dareeriyo kaadida
Cudur	Koriimada jeermiga dhibaataada u keena jirka
Kantaroolka cudurka	Joojinta jeermiga in uusan faafin iyo in uusan sababin cudur
Leysku daarto	Si fudu loo faafiyo, awood u leh in uu sababo cudur
Cudur	Jawaabta jirka ka bixiyo dhaawaca ama cudurka, calaamadaha waxaa ka mid ah gaduudasho, xanuun, iyo/ama bararka meesha
Jiididda neefta	Ku neefsiga
Hurdo beel	In aan la awoodin in la jiifto ama la soo jeedo
Hawlaha Loo Adeegsado Nolol Maalmeedka (IADL)	Hawlaha caadiga ee lagu qabto agagaarka guriga ama gudaha bulshada, kana mid ah diyaarinta cuntada, iibsiga raashinka iyo shaqada guriga
Insuliin	Hormoonka uu sameeyo beer yaraha oo jebiya sokorta iyo maadada cad
Jugta insuliinka	Xaalad ka dhalata insuliin badan ama cunta yar oo sabab u noqota sokorta aad ugu yar dhiigga
Barashada Leys Dhaafsado	Tababarka uu ardayga si firfircoon uga qeybgalo
Ka dhexeeyo shakhsiyaadka	Ka dhexeeyo Xariirka ka dhexeeyo dadka
Mindhicirada	Mindhicirada
Gadaal loo celin karin	Xaalad aan dib loogu celin kaarin sida ay ahayd
Gooni	Ka saaridda dadka kale

## J

Kala goys	Qeyb ka tirsan jirka, meel ay isugu yimaadaan lafaha, sida jilbaha, kala goyska gacmaha, iyo xussulada
-----------	--

## K

## L

Siilka	Laalaabka maqaarka afka siilka
Dhar dhaqidida	Dhaqidida, qalajinta, feerada, iyo tolidda labbiska iyo marada uu macaamilka isticmaalo ama kaalmada la siiyo macaamilka si uu u fulliyo hawlahaan
Hababka waxbarashada	Sida qofka u isticmaalo dareenkiisa/dareenkeeda jirka si ay wax u barato
Dilaacyada	Nabaro
Kor u qaad	Qaad, dhaqaajin
Margi	Xargo adag oo ka samaysan hilibka isku xera lafaha
Linen	Sariirta, maryaha, galka barkimanka, dhar dhaqidida iyo shukumaanka

Dhaqaaqa	Sida qofka u dhaqaaqo
Lubrikant	Maado, sida burcadda batroolka, glycerin ama kreemka qabooban, ee loo isticmaalo in lagu sameeyo meel salaaxan ama qoyan iyo si loo yareeyo lissanka ama cuncunka
Saliidda la mariyo shay	Si looga dhigo taraarax ama salaaxan

## M

Mandatory Reporter	Qofka sharciga ka rabo in uu soo sheego xumaatada la tuhunsan yahay, dayaca ama ka fa'iideysiga maaliyadda qofka weyn ee nugul
Nafaqo xumo	Xaalad ka dhalata cunid la'aanta cunto ku filan ama in aan la cunin cunto caafimaad qabta
Diyaarinta cuntada	Waxaa ka mid ah qorsheynta cuntada iyo cuntada khaaska, cuntada loo diyaariyo macaamilka aan awoodin in uu ka qeybqaato, iyo nadiifinta ka dambayso cuntada.
Medication administration	Daawada la geliyo afka macaamilka ama marka laga mariyo indhaha, dhagaha, maqaarka, ama qeyb kale oo ka tirsan jirka. Tani waxaa samayn kara oo keliya RN, LPN ama xubin ka tirsan qoyska. RN waxay kaloo hawshaan u dirsan kartaa NAC, NAR iyo HCA shahaado haysta
Medication assistance	In la kalmeeyo macaamilka si uu u qaato dawooyinka, lana raaco "Shanta Xuquuq". Tani waxaa ka mid ah tababarka, in gacanta laga saaro weelka daawada, furidda weelka daawada, isticmaalka awood siiyaha ama daawada gacanta laga saaro macaamilka
Medication Route	Sida loo qaato daawada, sida afka, qeyb ka tirsan jirka, futtada, siilka, neefta, ama duridda
Xumaatada loo geysto madaxa	Ula kac loogu talagalay in uu qof gaarsiiyo xanuunka caatifaadda ama dhibaato
Cudurka madaxa	Wareerka ku dhaca maskaxda oo saameeya fikradaha, caatifaadda, iyo dabecadda
Maskax ahaan isku fillan	In si fasiix iyo si macquul ah loo fakaro
Nafleyda yaryar	Bakteeriyaha cudurka dhaliyga, ama ku nafley, aad u yar in lagu arko isha, laguna arko mikrokoobka oo keliya
Dhaqaaqa	Awoodda lagu socdo, laguna warwareego
Kaalmada dhaqaaqa	Qalabka lagu kaalmeeyo macaamiisha in ay socdaan una dhaqaaqaan si sahlan, sida baakoorta iyo waxyaabaha loo adeegsado socodka
Dhacaan	Dareere dhagdhaga, qoyan oo ku jira gudaha sanko iyo qeybo kale oo ka mid ah jirka
Xuubka dhacaanka	Maqaar qafiifsan oo soo saara dhacaan si uu u badbaadiyo gudaha jirka, (sida sanko iyo afka)
Siistemka muruqa	Muruqaha, u ogolaada in qeybaha jirka dhaqaaqaan
Wadno qabadka	Wadno qabadka



## N

NPO	Aan waxba ka qaadan karin afka, raashin ama cabbitaanka laga qaato afka
Difaaca dabiiciga jirka	Maadooyinka dibadda iyo gudaha ee ku jiraa jirka oo kaalmo ka geysta burburinta jeermiga (taasoo ah maqaarka, unugyada cad ee dhiigga, aashitada caloosha)
Dayaca iyo dayacidda	Si loo diido ama loogu guul dareysto daryeelka loo baahan yahay ama lagama maarmaanka aasaaska nolosha
Aan dhaqaaqi karin	Ma socon karo
Aan afka laga sheegin	Soo jeedinta aan lagu hadlin, luqadda jirka, soo jeedinta wjijiga, iyo dhaqaajinta gacanta
Da'da caadiga	Habka caadiga ah lagu weynaado, waxaana ka mid ah isbaddalada la saadaalin karo sida jirka u shaqeeyo
Dirista kalkaalayaha	Marka RN ay hawsha u dirto aqoonyaanada NAC iyo NAR
Waxyaabaha laga helo nafaqada	Maado kasta ay u baahan yahiiin dhirta ama xoolaha si ay noolaadaan una koraan
Nafaqada	Habka jirka u qaato una isticmaalo raashinka

## O

Cayil	Miisaan badan
Warqado xaqiiqo ah	Qorista xaqiiqada oo keliya
Fiiri/Fiirinta	Si loo fiiriyo isbaddalada xaaladda
Ombudsman	Qof u doodaa xuquuqda macaamilka oo ku jira hay'adaha xanaanada muddada dheer
Su'aalaha horay ka furan	Su'aalaha u baahan sharaxaad ama wada hadal
Afka	Shay kasta oo lagu sameeyo afka
Nadaafadda afka	Nadaafadda ilkaha, afka, iyo ciridka
Xubin	Qeyb ka tirsan jirka oo qabata shaqo gaar ah, sida maskaxda, caloosha, iyo sambabaha
Xubin	Shay kasta oo nool
Qafiifka lafaha	Xaaladda caafimaadka marka lafaha ay qafiif noqdaan oo si fudud u jabaan taasoo ugu wacan yaraan kalsiumka ama fitamiin D ama isbaddalka hormonaadka

## P

Talaabo	Xawaaraha shay lagu sameeyo
Naafonimo	Luminta awoodda lagu dhaqaajiyo qeyb ka tirsan jirka
Cabsida	Xaalad uu qofka ku fakaro in wax xun dhici doonaan ama in ay jiraan dad raba in ay isaga/iyada wax gaarsiiyaan

Naafonimada lugaha iyo jirka hoose	Naafonimo laga bilaabo dhexda ilaa hoos
Si kale u sheegid	Ku celinta oraahda adiga oo isticmaala erayadaada
Parkinson's	Cudur ku dhacxa siistemka xididdada dhexe, si tartiibka ah uga sii darta oo sabab u ah adkaanta murqaha, jareyska, gariirka iyo tabar darrida
Cudur	Jeermi kasta oo keen cudur
Pericare	Nadiifinta hoosta iyo agagaarka futtada; waxaa kaloo lagu magacaabaa daryeelka hoosta
Inta u dhexeyso futtada iyo siilka	Hoosta qofka; ragga, waxaa ka mid ah guska iyo xiniinyaha; dumarka, waxaa ka mid ah faruuraha hoosta iyo siilka
Adeegyada daryeelka shakhsiga	Hawlaha la sameeyo si macaamilka loogu kaalmeeyo hawlaha nolol maalmeedka iyo hawlaha qalabka nolol maalmeedka
Nadaafadda shakhsiga	Hawlaha la sameeyo si macaamilka loogu kaalmeeyo hawlaha nolol maalmeedka iyo hawlaha qalabka nolol maalmeedka
Xanuun yar	Qalalka aan dhalinin luminta garashada
Xiiqley	Cudurka ku dhaca sambabaha, calaamadaha waxaa ka mid ah qandhada, qarqaryada iyo qufaca
Positioning	Sida habboon ee qofka loo meeleeeyo marka uu fadhiyo ama jiifo
Qaabka	Xawaaraha shay lagu sameeyo
Taxadir	Talaabooyinka horay loo qaado si looga hortago halista suurtoogalka ah
Fikradaha la qabo	In go'aano laga gaaro ama laga qaato fikrado xun khaas ahaan marka la gaaro iyadoo aan laga fakarin ama aan aqoon loo lahayn
Dhibcaha cadaadiska	Meelaha jirka ku yaal ay lafaha soo saaraan cadaadis badan sida murqaha iyo maqaarka
Pressure ulcers	Burburka ku dhaca maqaarka ama dhaawaca uu ka dambeeyo cadaadiska ama lissank oo burburiya maqaarka iyo muruqa hoos yaal
Asturnaanta	Si loogu qariyo daah marka qofka lagu kaalmeeyo daryeelka shakhsiga ama in aan laga hadlin arrimaha shakhsiga macaamilka
Xallinta dhibatooyinka	Habka la isticmaalo si looga hortago dhibaataada ama xaaladaha adag
Hab	Talaabadaha saxsan ee loo sameeyo shay
Aqoonyaan	Muujiinta hab ay ku jirto xushmad, garasho, iyo shaqo oo lag muujiyo goobta shaqada
Xuduudda aqoonyaanka	Xuduudda ku habboon xariirka shaqada
Aqoonta	Raacidda heer sare xagga asluubta qofka
Jir la farsameyay	Jir la farsameyay sida lug, gacan, naas, ama il
Protective barriers	Daboolka si leysaga ilaaliyo wareejinta cudurka sida gacan gashadka, daboolka, muraayadaha indhaha, ama gorgorada. Waxaa kaloo la yiraah Qalabka Badbaadinta Qofka ama PPE
Cilmu nafsiga	La xariira madaxa qofka



Xariirka ka dhexeeyo arrimaha bulshada iyo fakarka qofka	La xariira caatifadda qofka, cilmu nafsiga, iyo fiyoobida bulshada
Sambabaha	Tixraaca sambabaha
Garaaca xididka	Garaaca xididdada, waxaa sababa garaaca wadnaha marka uu bambeeyo dhiigga

## Q

Naafonimada gacmaha iyo lugaha	Naafonimo laga bilaabo qoorta ilaa hoos
--------------------------------	---

## R

Baaxadda dhaqaaqa	Ilaa inta kala goyska dhaqaaqi karo
Dayactirka	Soo celinta awoodda jirka qofka iyo/ama maskaxda
Warbixinta	Gaarsiinta macluumaad muhiim ah
Ilaha	Adeegyada la heli karo iyo macluumaadka
Xushmadda	Qofka si gaar ah loo xushmeeyo
Neefsi	Neefta, kana mid ah neefsiga, ama neefta hawada, iyo soo saarka neefta ama neefta dibadda loo soo saaro
Siistemka neefsiga	Kooxda xubnaha jirka ee fulliya hawsha neefta; siistemka oksojiinka soo geliya jirka iyo ka saara karbon dioxide
Restraint	Qalab ama ficil xanniba ama soo kooba dhaqaaqa macaamilka. Isticmaalka waxyaabaha lagu celceliyo qofka waa sharci darro
Xuquuq	Heerarka caddaaladda, sharciga, iyo asluubta, tusaalooyinka waa xaqa loo leeyahay asturnaanta iyo xaqa loo leeyahay in la diido daweynta caafimaadka
Kaalin	Waxa laga filaayo in qofka uu sameeyo iyo in uusan sameynin
Caadiga	Jadwalka ama sida loo sameeyo shay

## S

Halista ammaanka	Xaalad halis ah ama wax hor taagan ammaanka
Bakteeriyaha gala mindhicirka ee sumeeya raashinka	Bakteeriyaha laga qaado raashinka ama biyaha wasakhaysan taasoo sabab u ah cudur ka dhaca mindhicirada yaryar
Sanitize	Si loo nadiifiyo iyo si looga dillo jeermiga
Dhacaan	Si loo soo saaro iyo logaa sii daayo dareeraha
Daggan	Nolosha qaadata jimicsiga jirka qafiisan ee la xariirta nolosha caadiga maalin ilaa maalin
Qalalka	Hawl aan caadi ahayn oo ku dhacdaa maskaxde, taasoo sababta walaaca jirka
Self Directed Care	Marka macaamilka ku sugan guriga uu Bixiyaha Shakhsiga faro in uu isaga/iyada ku kaaomeeyo hawlaha la xariira caafimaadka. Tani uma baahna Dirista Kalkaaliyaha

Dareenka	La xariira dareenka aragga, maqalka, taabashada, dhadhamiska, iyo urka
----------	--





Soo koobidda adeegga	Qey ka tirsan qorshaha daryeelka DSHS oo qoraal ka sameysa macluumaadka xariirka, jadwalada bixinta daryeelka, iyo ujeedooyinka maacaamilka
Xumaatada kacsiga	Qaab kasta, taabashada kacsiga aan la rabin
Kacsi	Sifooyinka ama dareenka la xariira kacsiga
Naxtin	Xaaladda marka qofka dhaco taasoo ka dhalata dhiig yarida iyo cadaadiska dhiigga, badanaa waxaa sabab u ah dhaawacyada darran sida dhiig baxa ama gubashada qeybo badan oo ka tirsan jirka; waxay kaloo ka dhalan kartaa jug soo gaarta caatifadda ama xanuunka.
Waxyeelada la socda	Waxyeelada xiga, badanaa aan la jecleyn ee ka dhasha daawada ama daweynta
Siistemka lafaha	Lafaha iyo waxyaabaha isku xera ee bixiya habka jirka u shaqeeyo
Maqaar	Xubinta jirka ee daboosha jirka iyo badbaadisa, ka samaysan qeybaha jirka
Skin breakdown	Gaduudashada, burburka ama dillaca maqaarka taasoo abuurta halista cudurka iyo dhaawac dheeraad ah
Daryeelka maqaarka	Nadiifinta iyo badbaadinta maqaarka
Ammaanka maqaarka	Maqaarka aan lahayn dhaawaca
Looxa taraaraxa	Looxa loo isticmaalo in lagu dhaqaajiyo dadka haddii aysan jirin dhaawac ka soo gaaray xariirta dhabarka, ee lagu magacaabo looxa wareejinta
Xariirta dhabarka	Mid ka mid ah xubnaha muhiimka ah sistemka xididdada, waxay ku jirta gudaha xariirta dhabarka, waxayna qaadaa fariimaha ka yimaada maskaxda oo gaara qeybaha kale jirka, iyo ka timaada qeybaha jirka kuna soo noqota maskaxda; waxaa kaloo lagu magacaabaa laf dhabarka
Ruuxa	La xariira ruuxa ama nafta, la siyaarto, ama diini
Cantuuf	Dhacaanka la qufaco oo ka soo baxa sambabaha
Taxadirka caadiga	Dhaqanka la ogol yahay oo loo isticmaalo in looga hortago waxyaabaha cudurka keena ee ku faafsan dhiigga, dhacaanka jirka, maqaarka aan ishaysanin ama xuubkaa dhacaanka
Sharootada nadiifinta	Dabool lagu badbaadiyo, ka madax banaan bakteria, oo la saaro dhaawaca
Ka dilidda jeermiga	Habka loo burburiyo dhamaan nafleyda yaryar, kana mid ah unugyada funguska iyo dhirta
Lafta xabadka	Lafta xabadka
Saxaro	Saxarada, socodka caloosha
Duleelka caloosha	Duleel la farsameyay oo isku xera jirka iyo dibadda; macnaha qaliinka mindhicirka, jeexa lagu sameeyo tubada hawada qaado, qaliinka tubada la geliyo oo isku xerta mindhicirka iyo caloosha ama qaliinka kaadida ka leexisa kaadi haynta
Shiddo	Xaalad kasta ama fikrad oo kugu abuurta wareer, carro, ama walwal

Qorista dareenkaada shakhsiga, waxa aad la kullantay, ama tarjamada	Kala go' ama xididka dhiigga oo xerma gudaha maskaxda taasoo dhiigga ka ilaalisa maskaxda, waxaa kaloo lagu magacaabaa dhiigga ku furma maskaxda
Xasuus qorka lagu qoro jaantuska bukaanka	Qorista dareenkaada shakhsiga, waxa aad la kullantay, ama tarjamada
Calaamadda	Caddeynta cudurka, qaladka, ama xaaladda

## T

Heerkulka	Cabbirkaa kuleelka
Hilibka isku haayo murqaha iyo lafaha	Xargo adag oo isku xera hilibka murqaha iyo qeybaha kale jirka
Daweyn	Daawada ama hawsha qofka ku kaalmeysa in uu soo roonaado ama raysto
Heerkulbeegga	Qalabka lagu cabbiro heerkulka
Dhawaaqa	Dhawaaqa ama codka erayada aad ku hadashid
Qalab	Farsamada ama waxyaabaha kugu kaalmeeya in aad dhamaysid hawsha
Sun	Maado sun ah, waxaa soo saari kara bakteeriya, oo keeni kara xanuun iyo cudur
Transfer belt/suunka wareejinta qofka	Suun lagu xerto dhexda si loo kaalmeeyo wareejinta iyo socodka
Looxa ku wareejinta	Loox fidsan oo qofka u ogolaada in uu ku taraaraxo hal meel fidsaan ilaa meel kale
Transfers	Qofka laga dhaqaaqiyo hal meel ilaa meel kale; tusaale ahaan hal sariir ilaa kursiga lugaha leh
La gudbiyay	Habka shay looga wareejiyo hal qof ama meel ilaa qof kale ama meel kale
Safarka lagu tago adeegga caafimaadka	Raacidda iyo/ama qaadidda macaamilka la geeyo xafiiska takhtarka ama kliinikadaa xaafadda si loo helo baarista caafimaadka ama daweynta
Tiibisho (TB)	Cudur hawada raaca, waxaa sabab u ah bakteeriya, badanaa wuxuu saameeyaa sambabaha
Nabar	Wax aan caadi ahayn oo ka soo baxa gudaha jirka ama jirka korkiisa; wuxuu ahaan karaa mid aan dhibaato lahayn, ama mid xun. Nambor xun waxaa kaloo lagu magacaabaa "kansar"

## U

Suuxsan	Aan soo jeedin, aan awoodin jawaab
Taxadirka guud	Tallaabooyinka ammaanka la isticmaalo marka laga hadlo dhiigga iyo dhacaanka jirka
Baarista kaadida	Baarista shaybaarka ee loogu talagalay in lagu ogaado cudurka
Kaadi	Weel loo isticmaalo in lagu kaadiyo
Tubada yar ee la geliyo kaadi mareenka	Tubo la geliyo kaadi haynta si loo dareeriyo kaadida



Tifiqifiqa kaadida	Awood la'aanta lagu kantaroolo shaqada kaadi haynta
Siistemka kaadida	Qeybaha jirka oo shaqadoodu tahay soo saarka kaadida iyo ka saaridda jirka
Tubada kaadida	Xibnaha jirka ee soo saara iyo fogeeya kaadida, kana mid ah killyaha, tubada isku xerta killyaha iyo kaadi haynta, kaadi haynta iyo tubada kaadida ka qaado kaadi haynta
Cudurka tubada kaadida (UTI)	Cudur ku dhaca qeyb ama qeybo badan ama meesha kaadida marto, waxaa dhici karto in uusan lahayn calaamado
Kaadida	Habka kaadida looga saaro kaadi haynta
Kaadi	Wasakhda ka soo dareerta killyaha

## V

Qaxyaabaha la qiimeeyo	Dabeecad khaas ah ama caado loo arko in ay muhiim tahay
Xiddid	Xiddidka dhiigga geeya wadnaha
Cod	Erayada lagu hadlo
Laf dhabarka	Lafaha dhabarka
Firus	Nafleyda ugu yar, la yaqaan ee keena cudur
Aragga	In maskaxda wax laga arko
Itaal darrida arragga	Camonimada ama la lumiyo aragga
Banaan	Kaadi
Mattagga	Mattagga waxa ku jira caloosha oo laga soo saaro afka
Nugul	Si fudud loo dhaawaco, loo qalqaaliyo, ama loo weeraro
Qof weyn oo dhibaato soo gaari karto	A person who is 60 years of age, or older, who is not able to care for him/herself because of a functional, mental or physical disability; or is 18 or older who: lives in an adult family home, boarding home, or nursing facility; receives personal care services in his/her home; has a developmental disability; or is incapacitated

## W

Socdaha	Kaalmo loo isticmaalo socodka
Miisaan	Cabbirka cuslaanta
Kursiga lugaha leh	Kursi la saaray lugaha wareega
Saadka looxa	Kala goynta, iskor saarka ama looxa loo xamaalo macaamilka marka looxa yahay ilaha keliya ee laga helo shidaalka kululeynta ama kariska, wuxuu ku kooban yahay looxa yaal guriga mana ku jiro isticmaalka miinshaarta ama jaridda geedaha.
Dhaawac	Dilaac kasta oo ku yimaada maqaarka ama xubin